



Somali Federal Republic
Federal Parliament
Office of the Speaker

Taariikh: 12^{ka} Sebteembar 2015

MAARAYNTA WADAHADAL-GELINTA MOOSHINKA KU TAARIIKHSAN
12^{ka} AGOOSTO 2015

1. Guddoonka Baarlamaanka Federaalka ka dib markuu uu wada tashi xal raadis ah la galay xildhibaanada Golaha Shacabka ee soo jeediyey mooshinka kor ku tixraacan gaar ahaan, iyo xildhibaanada Baarlamaanka Federaalka guud ahaan, iyo Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka iyo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, xildhibaanada iyo xafiisyada kor ku xusan iyo dhammaan shacbiga Soomaaliyeed meel kastoo ay joogaan lagu wargelinaya in dhinacyada ay khuseyso wada oggolaadeen in ay galaan wada xaajood lagu xallinaayo tuhummada gaboodfal ee lagu soo oogay Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,
2. Madaxweynaha Jumhuuriyadda wuxuu wakaalad buuxda siiyey una xilsaartay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda M.ne Cumar Cabdirashid in uu xildhibaanada ay arrinta khuseyso kala xaajoodo tuhummada ay soo jeediyeen oo xal maangal ahna la wada gaaro, asaga oo xilsaarashadiisuna ku ballanqaaday in go'aannada wada hadalka lugu gaaro sidooda loo meelmariyo.
3. Xildhibaanada soo jeediyey mooshinka waxaa laga codsanaya inay sida ugu dhakhsaha badan soo magacawdaan soona gaarsiyaan Xafiiska Guddoonka wakiillada u galaya wadahalka.
4. Wadahalka waxaa hoggaamin doona Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo ku-Xigeennada Guddoomiyaha, waxaana labada dhinac laga codsanaya in ay golaha wadahalalka ku soo fadhiistaan niyadsami u abbaran u danaynta wanaagga guud ee dalka, ayadoo toos loo abbaaraya heshiis ka gaaridda iyo xallinta qodobbada ku xusan mooshinka, oo qodobqodob si wax-ku-ool ah qodob walba looga heshiyo, tallabada ku habboon ee laga qaadayona laysla meeldhigo, anagoo heshiis doon ah, oo kaashanayna Hadal Ilaahey iyo

xeerarka shuruucda dalka. Wada hadalkuna waa in lagu soo afjaro laba toddobaad gudahood ama ka yar. Haddii arrimahan wada hadalka xal looga gaari waayo, wadiiqada furan waa in loo gudbiyo Maxkamadda awoodda u leh in ay soo hubiso in tuhummadu leeyihiin saldhig sharci, si waafaqsan dastuurka iyo shuruucda dalka u degsan.

5. Muddada wadahalalku socdo waxaa xafiisyada wadaxajoodka ku jira iyo xildhibaanaba ka reeban ka hadalka warbaahinta iyo in ay ka digtoonaada adeegsiga ereyo xanaf keeni kara iyo wax walboo carqalad ku keeni kara habsami u socodka heshiinta.
6. Guddoonka Baarlamaanka Federaalka wuxuu mahad gaar ah u jeedinaya Madaxweynaha Jumhuuriyadda Soomaaliya, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka, dhammaan xildhibaanada Golaha Baarlamaanka sida wacan oo xilkasnimada ku dheehan ay u oggolaadeen soo jeediinta wada hadalgelidda Guddoonku ujeediyey.
7. Sidoo kale waxaan u mahadcelineynaa Madaxda Dawlad-Goboleedyada iyo Maamullo-Goboleedyada KMG ah talooyinka iyo taageerada ay nagu siiyeen wadahalgelinta arrimaha mooshinkan
8. Mahad gaar waxaa naga mudan Shacbiga Soomaaliyeed guud ahaan sida xassilan iyo sida ay u muujiyeen kalsoonida ay ku qabaan hay'adahooda Dawladda, waxaa kaloon gaar ahaan mahad iyo gallad u hayna Bulshada Ra'yadka ahe ee agaasiman ay ka mid yihiin Culamaa'u Diinka, Ururrada siyaasadeed, Dhallinyarada isu-kobcin raba in ay noqdaan axzaab siyaasadeed, Ururka haweenka, talooyinka ay noo soo gudbiyeen iyo dhirrigelinta ay nagu taageereen.
9. Waxaa kaloo mahad naga mudan Safiirada dalalka Carbeed ee aan walaalaha nahay, Diblomaasiyiinta dalalkooda u fadhiya Soomaaliya deeqbixiyeyaasha iyo beesha caalamka guud ahaan dhaqan dibloomaasiyadeed wacan ay muujiyeen iyo faragelin la'aanta ay ku taageersan yihiin daahfurnaanta arrimahan lagu maaraynayo iyo in ay taageerayaan go'aan kastoo ay gaaraan hay'adaha dastuuriga ah qaranka.
10. Waxaan Allahu *Subxaanahu wa tacaalaa* ka baryeynaa in uu towfiiq na wada waafajiyo iyo heshiis umadda u roon oo waara.

